

JUMHUURIYADDA SOOMALILAND


IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2018

AF-SOOMAALI



GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA





Wadarta guud

Magaca.....

Dugsiga.....

Roll No.....

JUMHUURIYADDA SOOMALILAND
GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA SOOMAALILAND
FASALKA AF-RAAD

IMTIXAANKA
AF-SOOMALI

June 2018

WAKHTIGA: 2 SAACADOOD

10 daqiiqo oo dheeraada ku akhri dhammaan waraaqaha si aad uhubiso.

TILMAAMO:

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay 11 waraaqadood oo daabacan

Tiri imika, oo wargeli horjoogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama dheeraad yihiin

QAYBTA 1AAD:	SHEEKO IYO EREYO	30 DHIBCOOD
QAYBTA 2AAD:	MAANSO	15 DHIBCOOD
QAYBTA 3AAD:	AF-MALDAHANAHA IYO H/HAWLEEDYO	15 DHIBCOOD
QAYBTA 4AAD:	NAXWE IYO MAAHMAAH	20 DHIBCOOD
QAYBTA 5AAD:	CURIS	20 DHIBCOOD
	WADARTA DHIBCAHA GUUD	100 DHIBCOOD

Qaybta 1-aad:

(30 dhibcood)

b) Akhri sheekadan kadibna ka jawaab weydiimaha ka dambeeya.

Inkastoo dhabcaalnimada aad loogu xaman jiray, dhuuni laga martiyo iyo dheef lala wadaagana dadka intiisa badani sheegi jirin, mar qudha ayey beenowday filashadii iyo humaagii aan kahaystay haybe. Qudha aan la kulmay iyo qofkii la iisheegi jiray ayaa kaaf iyo kala dheeri noqday, wax kasta oo male-awaalka maankaygu is tusayna xaqqi qadu umay markhaati furin. Dhaqanka aan haybe ka arkayo iyo dhawaqyadii I soo gaadhi jiray ayaa aad ukala dheeraaday.

Isagoo dhoosha ka qoslaya markuu I qaabilay, saasaantii gobta lagu yaqaanay sideediina ii gacan qaaday, maskaxdaydu may guddoomin galladaasi, balse gees kale oo gurraacan ayey ula gurguuratay. Garawsho haddii aan ka sugayey si qaawan ayey iigu gacan saydhay. “weligaa gacantii go’day foolkiisu furan yahay oo marti fiid utimi gogol u fidiyey miyaad aragtay” ayey si jeesjees ku jiro weydiisay.

Si nayad-samida ah ee uu ii shegaysanayey, warkana iiga gurayey iyo sida kalsoonida leh ee uu haasaawaha iigu deexanayey, haddii aan la dhacay, maskaxdaydu dhanka fiican kamay eegin xaqqi qada dhaayuhu arkayaan. “dhab kama aha ee malaha wuu iska kaa dhaadhiinayaa? Imisa qof baad dhaliishiisa ka maqashay? Ma dadkaas oo dhan baa wada dhoohan.” Weydiimahaas dhab-ka cararka ah ayey sida dhacanta afkayga u saartay, iyadoo dhalanteed ka dhigaysa dhalanka wacan ee Haybe ka muuqda.

Sooryada uu noo keenay intii aanu cunaynay, mar qudha kamaad dareemayn hiif iyo hagrasho midnaba. Balse maskaxdaydu way quudhi weyday deeqsimada Haybe, mar qudhana may qarsan sida lib-gadnimada ah ee ay samihiisa u quudhsanayso. “Bakhayl nayl qalay belaayooy baydh badanaa” ayey ku celcelinaysay intii aanu Haybe la joognay oo dhan, mahad celintii uu ka mudnaana way ku masuugtay balse way iga maanici kari weyday milgihiisa inan muujiyo.

Habeenkii oo dhan maanu kala ledin aniga iyo maskaxdaydu. Anigu loodin kari waayey iyaduna I liicin kari weyday. Muddo badan haddii aanu iska lulanay murankayaguna gudhi waayey, gebo gebadii maskaxdaydu runta way u bir dhigi kari weyday, war kasta oo ay hore u guntadayna qasab bay noqotay inay qubtaa.

Q1aad. B) Goobaabin geli jawaabta saxda ah

(20 Dhibcood)

1. Dulucda sheekada waxa lagu soo koobi karaa:
 - b) Bakhayl nayl qalay belooy baydh badanaa
 - t) Barasho horteed ha I nicin
 - j) laba kala bariday isma war la'
 - x) Qof kasta siduu kuu yahay u noqda
2. Haybe iyo qofkan hadlayaa halka ay ku kulmeen waxay ahayd
 - b) meel maqaaxi ah
 - t) Goob shaqo
 - j) Guriga Haybe
 - x) Dugsi waxbarasho
3. Odhaahda ah "Kaaf iyo kala dheeri" waxa looga jeedaa
 - b) waa isku mid
 - t) Aad bay u kala fog yihiin
 - j) lama kala garto muuqaal ahaan
 - x) waa la isku qaldi karaa
4. Qoraaga maskaxdiisu waxay u diidaysay inay Haybe samaantiisa aragto
 - b) colaad baa ka dhexaysay iyada iyo Haybe
 - t) Indho wax lagu arko ayaanay ahayn
 - j) wax dad hore u sheegeen ayey rumaysatay habsiimo la,aan
 - x) way iska nacday bilaa sabab
5. Af-maldahanaha ka dhex muuqanaya qaabka qoraagu sheekada innoogu soo gudbiyey waa
 - b) sarbeeb
 - t) Tiraab
 - j) Qofayn
 - x) makeeki

6. Qoraagu wuxu inoo sheegay sida Haybe sheekada uga gurayey inay ahayd
b) si cadho ka muuqato
t) si aan dan iyo muraad ka lahayn warka loo wado
j) si ixtiraam iyo qaddarini ku jirto
7. weydiimaha dhab ka cararka ah sababta Maskaxdu u keentay waxay ka ahayd
b) In ay waxba kama jiraan ka dhigto dabeecada fiican Haybe
t) In ay qiiqa isku qariso oo aan la fahmin
j) In ay wax hubsato oo aanay degdegin
x) In ay ku qanciso qoraaga qodobkay ku doodayso
8. “bakhayl naye qalay belaayooy baydh badanaa” ayey maskaxdu ku celcelinaysay
b) Intii ay dariiqa soo socdeen oo dhan
t) mar alle markii sidaa ay uargtay
j) Intii haybe lala joogay oo dhan
x) Markii ay gaar isku noqdeen iyada iyo qoraagu
9. In badan markii qoraaga iyo maskaxdu is haysteen, akhirkii
b) maskaxdii waa la qanciyey
t) Qoraagu siday sheegaysay ayuu la qaatay
j) midna tiisa lama raacin
x)weli haddaa way kala lushaan
10. sooryeeyntaas ka dib, Haybe iyo Qoraagu
b) way isku mahad celiyeen
t) weji gabax bay ku kala tageen
j) Ballan dambe ayey qabsadeen
x) cid kale ayaa soo kala dhex gashay iyagoon is macasalaamayn.

**Q1aad. T) Erayada ku jira qaybta “j” mid kasta ku beeg erayga ku lidka ah ee
ku jira qaybta “x” (10 dhibcood)**

Qaybta J	Qaybta X
1. say	b. Baar
2. Niyaayir	t. xigaal
3. Xidid	j. Murugo
4. sal	x. xalaal
5. Booli	Kh. Oori

Q 2aad. Maansada

(15 Dhibcood)

Si faahfaahsan u sharax ujeedada tuducyadan soo socda;

1. Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye
Dusha midabka soomaali baad dugulka moodaaye
Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii karal'e

.....
.....
.....
.....
.....
.....

2. Nin dharkayn mudmuday hoosna maray murux inshalleeye
Miyir waxad ku weydaan is waal kuma mihiibtaane

.....
.....
.....
.....
.....
.....

3. Dumarkuba xublada foosha way xanaf wareeraane
Balse inay xusuus daran yihiin, xaylka kale mooge

.....
.....
.....
.....
.....
.....

4. Gacalkeed ha weydee hadday geenyo kaa hebedo
Uu haayir nooliba yaqaan heeradkay mirato
Heesaha inaad kala baxdaa saw hal gara maaha?

.....
.....
.....
.....
.....
.....

Q3aad. Af-maldahanaha

(15 Dhibcood)

Sheeg Af-maldahanaha ku jira tuducyada soo socda

1. Dhool bari ka muuqdaa
Dhaan loo nageeyaa
Adiguna dhiggiisi
li soo dhalaashee

B) sheeg af-maldahanaha ku jira tuducyadan kor ku qoran

.....
.....

T) sababee doorashadaada

.....
.....
.....
.....
.....
.....

2. Isagoo harraad qaba asee haro dhan guud jooga
Inta uu hadhuudh daro nimaan haakah odhanaynin
Hilbo qalan hadduu haad ku dego ruuxan ka hiraynin
Ma anaa intaan hiilo bido hooto waran siiya?
Ma anaa intaan hawl u diro haatan hadhac waabta?

B) sheeg af-maldahanaha ku jira tuducyadan kor ku qoran

.....
.....

T) sababee doorashadaada

.....
.....
.....
.....

3. Iga dhimay ninkaad saacidaa laguma dhaataane
Hadba dhuuni ruuxi situu daba dhaqaaqaaye.

B) sheeg af-maldahanaha ku jira tuducyadan kor ku qoran

.....
.....

T) sababee doorashadaada

.....
.....
.....
.....
.....

Q4aad

B. NAXWE

(6 Dhibcod)

Ereyada xaggan hoose lagugu siiyey mid kasta ku buuxi weedh uu ku sax yahay

IYO , hor, six un, laga, kii, Annagu.

1. Wiilkii yaraa _____ baa loo dilay
2. Warqad ayaa _____ keenay laascaanood
3. Caasha _____ cumar ayaa tegay
4. _____ kuma jirno kuwii ku xantay
5. Labadii col way is _____ fadhiyaan
6. _____ lacagta xaday waa la qabtay

T. maahmaahda

(14 dhibcood)

“maan rag waa mudacyo afkood”

1. b. falanqee ujeedada maahmaahdan loo adeegsado. (2 dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....

2. t. maahmaahdani ma mid raga uun u gaar ah baa mise dumarkuna way la wadaagaan? Waayo? (3 dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....

“laamuhu siday isku xigaan ayey isku xoqaan”

3. b. si kooban uga hadal ujeedada loo adeegsado maahmaahdan. (3 dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

t. ma u malaynaysaa inu qof reer magaal ahi maahmaahdan curiyey?

Waayo?

(3 dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....

“taladaan la ruugin waa lagu rafaadaa”

“milil guudka lama dhayo”

Labadan maahmaahood eek or ku qoran faahfaahi

(3 dhibcood)

b. waxay isaga mid yihiin

.....
.....
.....
.....
.....
.....

Q 5^{aad} curis

(20 dhibcood)

is barbar dhig ku samee waxtarka iyo khasaaraha moobilku u leeyahay ardayda

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

